



Waaxda Qurba-Jooga

18 May 2026

Xuska Maalinta Qaran ee Jamhuuriyadda Somaliland

Sannad-guurada 35th ee ka soo wareegtay dib u la soo noqoshada qaranimada

Waaxda Qurba-joogga ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda & Iskaashiga Caalamiga ah ee Jamhuuriyadda Somaliland waxay ugu baaqaysaa dhammaan jaalliyadaha qurba-joogga Somaliland ee ku nool daafaha caalamka in ay si mug iyo midnimo qaran leh ugu dabbaal degaan Xuska Maalinta Qaran ee 18 May 2026, sannad-guurada 35aad ee ka soo wareegtay markii ay umadda Somaliland dib ula soo noqdeen qaranimadooda.

Maadaama uu xus-qarameedkani ku soo beegmay aqoonsiga ay Jamhuuriyadda Somaliland ka heshay Dawladda Israa'iil 26-kii December 2025 iyo guulo diblomaasiyadeed oo u soo hoyday qaranka JSL, waxaa loogu baaqayaa dhammaan jaalliyadaha qurba-joogga JSL in ay iyaga oo isku duuban weyneeyaan oo ay ka oogaan Xuska 18 May 2026 dalkasta iyo magaalo kasta oo ay ka joogaan waddamada caalamka.

18-ka May waa Maalinta Qaran ee la soo Noqoshada Qaranimada (Sovereignty Restoration Day) halka ay 26-ka June tahay Maalinta Madaxbannaanida JSL (Independence Day), labaduba waa maalmo taariikhi ah oo ay leeyihiin dadka iyo dalka JSL.

Hal-kudhiga sanadku waa: **“Aqoonsi & Adkaysi” (Recognition & Resilience)**

Waaxda Qurba-joogga, WADIC,
Hargeisa, Jamhuuriyadda Somaliland

